# Fair Housing and Equity (Guriyaynta Xaqa ah iyo Sinaanta (FHE)[1]) Qorshaha Helitaanka Luuqada iyo Isgaarsiinta (LCAP)[2]

## HORDHAC

Hiigsigayagu waa in la xaqiijiyo helida xaqa ah ee loo siman yahay ee fursadaha guryaha ah. Waxaanu ku dedaalnaa kordhinta sinaanta iyo yaraynta caqabadaha fursada dadka ku nool ee ka shaqaynaya gudaha Magaalada Boston.

## UJEEDDO

Waxay Guriyaynta Xaqa ah iyo Sinaanta (FHE) diyaarisay Language and Communications Access Plan (Qorshaha Helitaanka Luuqada iyo Isgaarsiinta (LCAP)) si loo qeexo borotokoolada iyo habraacyada ay hirgelisay FHE si ay u xaqiijiso helida wax ku oolka iyo guud ee adeegyada, barnaamijyada iyo waxqabadyada FHE ee dadka loo aqoonsado inay ku hadlaan Luuqad aan ahayn Ingiriisi iyo/ama dadka naafada ah.

**Qeexida Dadka ku hadla luuqad aan Ingiriisi ahayn (LOTE)**

Dadka leh kartida xaddidan ee akhriska, qoraalka, hadalka, ama fahanka Ingiriisiga waxay xaq u yeelan karaan kaalmada luuqadeed oo ay weheliso nooc gaar ah oo adeeg, dheef, ama kullan[3].

**Qeexida Dadka naafada ah**

Dadka naafada ah waa dadka qaba kala dhaltaalnaanta jidhka ama maskaxda oo si muuqata u xaddida hal ama in ka badan oo hawlaha nolosha ah. Hawsha nolosha ee muhiimka ah waxaa ku jiri kara, laakiin kuma xaddidna, araga, maqalka, cunida, seexashada, socodka, istaaga, qaadista, foorarsiga, hadalka, neefsashada, waxbarashadda, akhriska, diirad saarida, fekerka, wada xidhiidhka, iyo shaqada.

[1] Tani waa ku celinta koowaad ee turjumaada ee magaca waaxda. Waxaanu doonaynaa inaan si wada jir ah ula shaqayno bulshadda Boston si aanu si joogta ah u horumarino turjumaadan. Waxaanu si naxariis leh u waydiisanaynaa oo u dhiirigelinaynaa faallo celinta turjumaadan. Fadlan fariin ugu soo dir xafiiskayaga lca@boston.gov

[2] Si joogta ah ayaanu u shaqaynaynaa si aanu u hubino dhammaan qaybaha waaxaha in la gaadhi karo oo si joogta ah waxaanu uga shaqaynaynaa gaadhida dhammaan waaxaha. Haddii aad qabto su'aalo ama faallo celin ku saabsan aagaga qorshahan waaxeed, fadlan la xidhiidh: LCA@Boston.gov

[3] **Luqadda Aan ahayn Weedh Ingiisi ah:** Marka aanu fahmayno in eray bixinta Ku wanaagsnaanta Luqadda Ingiriisiga ah (LEP) ay isticmaasho HUD, xeerkan beddelkeeda waxa uu qaataa eray bixinta Luqad aan Ingiriisi ahayn (LOTE).

Qorshaha waxaa la cusboonaysiin doonaa 2 sannadood oo kasta waxaana ku jira qeybaha soo socda:

1. Heerarka Luuqada & Xogta tirada dadka loo aqoonsado inay yihiin LOTE ama naafada qaba ee Magaalada Boston.
2. Barnaamijyada ay u badan tahay inay isticmaalaan shakhsiyaadka ah LOTE iyo ama naafada ah
3. Helida banaamijyada iyo adeegyada muhiimka ah
4. Illaha loo heli karo dadka ah LOTE iyo dadka qaba naafooyinka
5. Dokumentiyada muhiimka ah
6. Soo xareynta Cabashada Helitaanka Luuqada iyo Isgaarsiinta

**(1) Heerarka Luuqada & Xogta tirada dadka loo aqoonsado inay yihiin LOTE ama naafada qaba ee Magaalada Boston.**

Gudaha Magaalada Boston, 110,376 shakhsiyaad ah, ama 16.9% dadka degan magaalada, uguma hadlaan Ingiriisiga sidii luuqadooda koowaad waxaanay baahi uun u qabaan helida luuqada ee hadalka, akhriska, qorida, ama fahanka Ingiriisiga. Guud ahaan, 15,886 qof, *ama* 2% ee dadweynaha Boston, ayaa loo aqoonsadaa inay qabaan naafanimada maqalka halka 15,861 qof, ama 2% ee dadweynaha Boston loo aqoonsado inay araga ka naafo yihiin. Macluumaadka dheeraadka ah ka eeg Warbixinta Xogta Dadka ee Luuqadda ee Magaalada iyo Warbixinta Xogta Dadka ee Naafada ee Magaalada. Si aad u aragto waxbixintan oo ku qoran luuqado badan fadlan booqo: boston.gov/lca

Magaalada Boston waxay raaci doontaa Heerarka Luuqada ee hoos ku qoran marka ay jiraan dhacdooyinka ay maalgaliso Magaalada Boston iyo Dokumentiyada iyo Macluumaadka Magaalada Boston.

***Is dhexgalka Codeeyayaasha ee Magaalada Oo dhan***

*Magaaladu waxay ku bixin doontaa ogeysiis luuqado badan luuqadahan soo socda, iyadoo ku wargelinaysa codeeyayaasha in turjumaad la heli karo marka la codsado. ASL ayaa looga baahan yahay dhacdooyinka magaalada oo dhan ee bixinaya macluumaad muhiim ah. Waaxahu waxay kala tashan doonaan LCA iyo Komishanka Naafooyinka wixii hagitaan intaa dheer.*

1. *Isbaanish (Laatiin Ameerika)*
2. *Shiiniiska La Fududeeyay*
3. *Shiiniiska Caadiga ah*
4. *Kiriyool Hayti*
5. *Fiidnaamiis*
6. *Kabo Ferdiin Kiriyool*
7. *Boortuqiis (Baraasiil)*

8. *Ruush*
9. *Carabi (caadi)*
10. *Faransiis (Yurubiyaan)*
11. *Somali*

***Dokumentiyada/Macluumaadka Muhiimka ah:***
*Magaalada Boston waa inay bixisaa Dokumentiyada/Macluumaadka Muhiimka ah luqaddaha soo socda:*

- *Isbaanish (Laatiin Ameerika)*
- *Shiiniiska La Fududeeyay*
- *Shiiniiska Caadiga*
- *Kiriyool Hayti*
- *Fiidnaamiis*
- *Kabo Ferdiin Kiriyool*
- *Shiiniiska kaantooniis*
- *Boortuqiiska (Baraasiil)*
- *Ruush*
- *Carabi (Caadi)*
- *Faransii (Yurubiyaan)*
- *Somali*

***Munaasabadaha Xaafada:***
*Magaalada Boston waxay siin doontaa adeegyada turjumaada hadalka iyo qoraalka munaasabadaha Magaalada Boston ee lagu qabto xaafadaha qaarkood iyadoo ku saleysan luuqadaha hoose:*

- **Allston** *Shiiniis*
- **Back Bay** *waxba*
- **Beacon Hill** *waxba*
- **Brighton** *Shiiniis, Isbaanish, Ruush, & Bortuqiis*
- **Charlestown** *Shiiniis*
- **Chinatown** *Shiiniis*
- **Dorchester** *Isbaanish, Fiidnaamiis, Hiyitaan Kiriyool, & Kabo Ferdiin Kiriyool*
- **Downtown** *Shiineys*
- **East Boston** *Isbaanish*
- **Fenway** *Shiineys*
- **Hyde Park** *Isbaanish & Hiyitaan Kiriyool*
- **Jamaica Plain** *Isbaanish*
- **Longwood** *Isbaanish*
- **Mattapan** *Hiyitaan Kiriyool & Isbaanish*
- **Mission Hill** *Isbaanish*

- **North End** *waxba*
- **Roslindale** *Isbaanish & Hiyitaan Kiriyool*
- **Roxbury** *Isbaanish, Kabo Ferdiin Kiriyool & Hiyitaan Kiriyool*
- **South Boston** *waxba*
- **South Boston Waterfront** *waxba*
- **South End** *Shiineys & Isbaanish*
- **West End** *waxba*
- **West Roxbury** *Hiyitaan Kiriyool*

**(2) Barnaamijyada ama adeegyada ay aad u badan tahay inuu isticmaalaan shakhsiyaadka ah LOTE iyo ama naafada ah**

Jadwalka hoose waxa uu muujinayaa qeybaha waaxaha iyo barnaamijyadooda iyo adeegyadooda ay u badan tahay inay la macaamilaan dadka loo aqoonsado inay yihiin LOTE ama dadka naafada ah.

| ***Qaybta*** | ***Barnaamijyada*** |
|---|---|
| Baadhitaanada | Wixii ah cabashada xafiiskayaga haddii aad qabto takoorka guriyaynta. Si loo bilaabo nidaamka, fadlan naga soo wac 617-635-2500, ama buuxi foomkayaga qabashada ee onlaynka ah.<br>◦ Foomka qabashada oo loo turjumay dhammaan luqaddaha badanka la isticmaalo.<br>◦ Turjumaada luqadda la heli karo |
| Guriyaynta Xaqa ah iyo Sinaanta | Buuxi Foomkayaga qabashada si aad u hesho taageerada haddii aad qabto:<br>• Guri ka saarid takoor oo dhib ka soo gaadhay<br>• Arrimaha dayactirka oo saamaynaya takoorkaaga<br>• Takoorka guriyaynta lala kulmay<br>◦ Foomka qabashada oo loo turjumay dhammaan luqaddaha badanka la isticmaalo.<br>◦ Turjumaada luqadda la heli karo |
| Guriyaynta Xaqa ah iyo Sinaanta | Waa sharci dari adeeg bixiyayaasha guriyayntu inay takooraan qoysaska haysata carruurta ka yar lix sano. Buuxi foomka qabsahada haddii aad ubaahan tahay caawimada ku sumowga kibriidka, beebaka kibriidka, heerarka kibriidka, rinjiga leh kibriidka, baadhitaanada kibriidka, baadhida kibriidka, yaraynta, ama ka saarida sunta kibriidka. |

| | |
|---|---|
| | ○ Foomka qabashada oo loo turjumay dhammaan luqaddaha badanka la isticmaalo.<br>○ Turjumaada luqadda la heli karo |

Yoolka barnaamijyadani waxa uu noqon doonaa in la xaqiijiyo in dadweynaha liiska lagu qoray ay si wax ku ool ah wax u helaan inta hanaanku socdo, sida lagu qeexay Qorshaha Helitaanka Luuqada iyo Isgaarsiinta.

**(3) Helida banaamijyada iyo adeegyada muhiimka ah**
Xafiiskayagu waxa uu si dhow ula shaqeyn doonaa xafiiska Helitaanka Luuqada iyo Isgaarsiinta si uu u helo hagitaan si aan u xaqiijino helitaanka wax ku oolka ah ee hawlaha, macluumaadka, adeegyada, iyo barnaamijyada muhiimka ah.

**(4) Illaha loo heli karo dadka ah LOTE iyo dadka qaba naafooyinka**
Magaaladu waxay heshaa kaalmada federaalka. Sidaas darteed, waxa waajib ka saaran yahay yareynta cabaqadaha luqada iyo isgaarsiinta ee dadka ka hor istaaga inay si buuxda u helaan adeegyada iyo barnaamijyada dowladda. Waax kasta waxa ay masuuliyaddi ka saaran tahay inay bixiso kharashka qaabilaadaha, turjumaada qoraalka, turjumaada hadalka iyo teknoolajiyada caawinta ee soo socda ee adeegyada, macluumaadka, barnaamijyada ama dhacdooyinka ay Magaaladu bixiso. Tan waxaa kama mid ah:

- ❑ Turjumaada Luuqada Hadalka: Fool ka fool, taleefanka iyo turjumaada muuqaalada foggaanta ah
- ❑ Turjumaada Luqadda Ishaarada/Gacmaha
- ❑ Turjumaada Dokumentiyada iyo Macluumaadka Muhiimka ah
- ❑ Turjumaada Waxyaabaha Qoran
- ❑ Qoraal u Beddelida Hadalka Isla-markaaba (CART)
- ❑ Teknoolajiyada Caawimada
- ❑ Qalabka Turjumaada Isku-marka ah

**(5) Dokumentiga Muhiimka ah**
Sanandka 2023-kii, Guriyaynta Xaqa ah iyo Sinaanta (FHE) waxay bilowday dib u eegida foomamka, waraaqaha iyo dokumentiyada loo isticmaalo maareynta barnaamijyadeeda, iyo aqoonsiga dokumentiyada loo tixgeliyo inay muhiim yihiin. Guriyaynta Xaqa ah iyo Sinaanta (FHE) waxay turjumi doontaa dokumentiyada muhiimka ah hadba intii macquul ah. Dokumentiyada muhiimka ah ee aan weli la turjumin waxaa ka mid ahaan kara Ogeysiiska luqaddaha badan. Ogeysiiskan waxa uu siiyaa codbixiyayaasha macluumaadka xiriirka si ay u codsadaan turjumaada bilaashka ah. Hoos ka eeg dokumentiyadayada muhiimka ah:

| Liiska Dhokumentiga Muhiimka ah | | |
|---|---|---|
| ***Cinwaanka Dokumentiga*** | ***Turjumaadaha*** | ***Qaababka la heli karo:*** |
| **Foomka Qabashada ee Shabakada:** Haddii aad dareemayso inaad la kullantay takoorka guriyaynta ah gudaha Boston, kani waa foomka lagu soo xareeyo cabashada dhanka Guriyaynta Xaqa ah iyo Sinaanta si loo qimeeyo haddii sheegashooyinkooda ay sharci yihiin. | • English<br>• Español/Spanish<br>• Kreyòl ayisyen/ Haitian Creole<br>• 繁體中文 / Traditional Chinese<br>• Tiếng Việt/ Vietnamese<br>• Kriolu /Cabo Verdean Creole<br>• Français/ French<br>• Af Soomaali/Somali<br>• 简体中文/ Simplified Chinese<br>• Português/ Brazilian Portuguese<br>• Русский/ Russian<br>• العربية/Arabic | |
| **Ogaysiiska Xuquuqaha iyo Nidaamyada Muddada Dhegaysiga Guud:** Kani waa Ogaysiiska kooxaha xuquuqaha iyo nidaamyada muddada dhegaysiga guud. | • English<br>• Español/Spanish<br>• Kreyòl ayisyen/ Haitian Creole<br>• 繁體中文 / Traditional Chinese<br>• Tiếng Việt/ Vietnamese<br>• Kriolu /Cabo Verdean Creole<br>• Français/ French<br>• Af Soomaali/Somali<br>• 简体中文/ Simplified Chinese<br>• Português/ Brazilian Portuguese<br>• Русский/ Russian<br>• العربية/Arabic | |
| **Ogaysiiska Xuquuqaha iyo Nidaamyada Muddada** | • English<br>• Español/Spanish<br>• Kreyòl ayisyen/ Haitian Creole<br>• 繁體中文 / Traditional Chinese | |

| | | |
|---|---|---|
| **Baadhitaanada**:<br>Kani waa ogaysiiska kooxaha xuquuqaha iyo nidaamyada muddada baadhitaanada | • Tiếng Việt/ Vietnamese<br>• Kriolu /Cabo Verdean Creole<br>• Français/ French<br>• Af Soomaali/Somali<br>• 简体中文/ Simplified Chinese<br>• Português/ Brazilian Portuguese<br>• Русский/ Russian<br>• العربية/ Arabic | |
| **Ogaysiiska Xuquuqaha iyo Nidaamyada Muddada Natiijooyinka:**<br><br>Kani waa Ogaysiiska ku socda kooxaha xuquuqaha iyo nidaamyada natiijooyinka ka dib ama xidhitaanka dacwadaha. | • English<br>• Español/Spanish<br>• Kreyòl ayisyen/ Haitian Creole<br>• 繁體中文 / Traditional Chinese<br>• Tiếng Việt/ Vietnamese<br>• Kriolu /Cabo Verdean Creole<br>• Français/ French<br>• Af Soomaali/Somali<br>• 简体中文/ Simplified Chinese<br>• Português/ Brazilian Portuguese<br>• Русский/ Russian<br>• العربية/ Arabic | |
| **Buuga yaraha Aagag qoondaynta:**<br>Hel dhammaan sharciga Aagaynta, taariikhda aagaynta takoorka leh, jawaabta dowladda federaalka ah, iyo sida Boston ay wax uga qabanayso dhibaatada. | • English<br>• Español/Spanish<br>• Kreyòl ayisyen/ Haitian Creole<br>• 繁體中文 / Traditional Chinese<br>• Tiếng Việt/ Vietnamese<br>• Kriolu /Cabo Verdean Creole<br>• Français/ French<br>• Af Soomaali/Somali<br>• 简体中文/ Simplified Chinese<br>• Português/ Brazilian Portuguese<br>• Русский/ Russian<br>• العربية/ Arabic | |
| **Buug yaraha Guriyaynta Xaqa ah**<br>Macluumaadka ku saabsan waaxda | • English<br>• Español/Spanish<br>• Kreyòl ayisyen/ Haitian Creole<br>• 繁體中文 / Traditional | |

| | | |
|---|---|---|
| Guriyaynta Xaqa ah iyo Sinaanta, nidaamyada iyo shuraakada. | Chinese<br>• Tiếng Việt/ Vietnamese<br>• Kriolu /Cabo Verdean Creole<br>• Français/ French<br>• Af Soomaali/Somali<br>• 简体中文/ Simplified Chinese<br>• Português/ Brazilian Portuguese<br>• Русский/ Russian<br>• العربية/Arabic | |
| **Boodhka Guriyaynta Xaqa ah**<br>Macluumaadka ku saabsan sida loogu soo xareeyo cabashada ku lidka ah takoorka Waaxda Guriyaynta Xaqa ah ee Boston iyo Sinaanta. | • English<br>• Español/Spanish<br>• Kreyòl ayisyen/ Haitian Creole<br>• 繁體中文 / Traditional Chinese<br>• Tiếng Việt/ Vietnamese<br>• Kriolu /Cabo Verdean Creole<br>• Français/ French<br>• Af Soomaali/Somali<br>• 简体中文/ Simplified Chinese<br>• Português/ Brazilian Portuguese<br>• Русский/ Russian<br>• العربية/Arabic | |

**(6) Soo xareynta Cabashada Helitaanka Luuqada iyo Isgaarsiinta**
Waxaad xaq u leedahay inaad soo xareyso cabasho haddii aad dareento in lagu takooray. Magaaladu kama aargoosato sababtoo ah shakhigu waxa uu soo xareeyay cabasho ku andacoonaysa takoor ku saleysan xaaladda LOTE ama naafanimo. Waaxdayadu waxay la shaqeyn doontaa Xafiiska Helitaanka Luuqada iyo Isgaarsiinta si wax looga qabto cabashooyinka.

***Sida loo soo xareeyo cabasho***:

- **Fool ka fool: Na weydii foomka cabashada ee luqadaada**
  - Large Print Version
  - Español/ Spanish-Versión en Letra Grande
  - Kreyòl ayisyen/ Haitian Creole -Vèsyon an gwo lèt
  - 繁體中文/ Traditional Chinese -大號字印刷版
  - Tiếng Việt/ Vietnamese -Chữ In Lớn

- Kriolu/ Cabo Verdean Creole - Versón na Letra Grandi
- Français/ French -Version en gros caractères
- Af Soomaali/ Somali- Daabacaada farta weyn
- 简体中文/ Simplified Chinese- 大字版
- Português/ Brazilian Portuguese -Versão em Letra Grande
- Русский/ Russian -Текст крупным шрифтом
- العربية/Arabic-نسخة بالخط الكبير

- **Iimeylka: ku soo dir cabashadaada LCA@boston.gov**
- **Wac: 617-635-3414 si aad u soo xareyso cabasho**
- **Boostada: Soo dejiso foomka cabashada oo boosta ugu soo dir:**
  - 1 City Hall Sq. #500
  - Boston, MA 02201
  - Language and Communications Access
  - Room 817
    - Large Print Version
    - Español/ Spanish-Versión en Letra Grande
    - Kreyòl ayisyen/ Haitian Creole -Vèsyon an gwo lèt
    - 繁體中文/ Traditional Chinese -大號字印刷版
    - Tiếng Việt/ Vietnamese -Chữ In Lớn
    - Kriolu/ Cabo Verdean Creole - Versón na Letra Grandi
    - Français/ French -Version en gros caractères
    - Af Soomaali/ Somali- Daabacaada farta weyn
    - 简体中文/ Simplified Chinese- 大字版
    - Português/ Brazilian Portuguese -Versão em Letra Grande
    - Русский/ Russian -Текст крупным шрифтом
    - العربية/Arabic-نسخة بالخط الكبير

- **Onlayn: Buuxi foomkayaga onlaynka ah ee cabashada**
  - Español/ Spanish
  - Kreyòl ayisyen/ Haitian Creole
  - 繁體中文 / Traditional Chinese
  - Tiếng Việt/ Vietnamese
  - Kriolu/ Cabo Verdean Creole
  - Français/ French
  - Af Soomaali/ Somali
  - 简体中文/ Simplified Chinese
  - Português/ Brazilian Portuguese
  - Русский/ Russian
  - العربية/Arabic